

”Dhawaansho – kalkaalin shakhsiyeed oo kaaga dhaw”

(waa shirkad qabata hawlaha adeegga dadka loo oggolaado in shaqaale loo qabto)

Si aan kuugu fidino ”kalkaalin shakhsiyeed oo kaaga dhaw” waxaan ka talaabo qaadaynaa aragtideena bartilmaameedka u ah shaqadeena dhinac kasta.

”waxaan rabnaa in aan kuu fududayno nolol maalmeedkaaga”

Aragtideena ayaa waxay noo hogaaminaysaa waxa aan maalin walba qabano. Waxaan fidinaa kalkaalin shakhsiyeed iyo adeeg ka jaanqaadaya qofka hawsha noo xilsaartay fursadaha uu haysto. Wadajir ayaan rabnaa in aan anaga iyo xilsaartaheenu u dhiso wadashaqayn meeldheer laga fiirshay oo la iska xilsaaray kuna dhisan is aaminaad iyo hawlqabad tayo ku habboon leh.

10 sano ka kor horumar socday

DHAWAANSHO kalkaalin shakhsiyeed waxaa aasaasay 1995 maamulaheena oo ah Ingrid Wikström. Muddadaas ay shirkaddu soo jiratayna waa ay kobocday, shaqaalihii waa sii xeel dheeraadeen, qibradihii aan helnayna waxaan u beddelnay kuwo wax ku ool u ah xilsaartayaasheena.

Shaqaleheenu wuxuu ka kooban yahay oo kaalinta koo-waad ka ah. kalkaaliyeyaasha shakhsiyeed ee noo jooga xagga kuwa hawsha noo xilsaartay. Ka dib shaqadaas aasaasiga oo ah in aan gacan kaa siino kalkaalin shakhsiyeed oo kaaga dhaw- waxaan fidinaa adeegyo badan oo qaybo kala duwan u kala baxa.

Qaybweyni waxay ku wajahan tahay wax ka qabadka hawlaha quseeya bay`ada shaqada, ku gacansiinta waxbarasho iyo abuuridda fursado horumariniya kuwa hawsha noo xilsaarta, shaqo nala wadaagayaasheena iyo shirkaddeena. Taasna waxaa keenaysa in aan ka soo baxno inaan leenahay shaqaale hawsha yaqaan, qibrad u leh oo fikrado fiican.

Qayb kale oo weyn ayaa waxay tahay in aan siino caawinaad la fulin karo oo ah xagga maamulka shaqaalaha, ha noqoto hawlaha mushaarada, canshuuraha, fasaxyada iyo xoghaynno kala duwan oo loo qabto kuwa hawsha noo xilsaarta iyo anaga lafteenaba. Shaqadaasna waxaa qabta dad xirfaddeeda iyo qibraddeedaba leh oo isugu jira kuwo dhaqaale iyo kuwo xoghaynba ee gudaha DHAWAANSHO.

Waxa ay wadaagaan dadka shirkadda oo dhani xilka ah in ay garab ku siiyaan oo u fududeeyaan hawl noo xilsaartayaasheena iyo kalkaaliyeyaashaba talo ahaan iyo adeegba mid yar iyo mid weyn.

Si qancisa in loo yeelo qofka hawsha noo xilsaartay

Xushmad, tixgelin iyo la jaanqaadid karaanka iyo waxa uu rabo qofka hawsha noo xilsaaranaya ayaa aasaas u ah habka aan u shaqayno.


Sidaas darted ayaan ma rwalba u doonaynaa inaan ka shaqayno sida ugu dhaw kan hawsha noo xilsaartay iyo nolol maalmeedkiisa.

Aqoon iyo waxbarasho

Waxaan si weyn u ilaallinaa waxa ka dhacaya adduunka si aan mar walba ula socono qaynuunada, sharciyada iyo fursadaha cusub ee soo baxa oo sii wanaajinaya adeegga loo qabto kuwa na xilsaarta. Aqoontaasna waxaan u gudbinaa kuwa hawsha noo xilsaarta iyo xigtadoodaba anagoo qabanayna kulano warbixinno ah iyo waxbarasho.

Dad la isku hallayn karo, aqoon leh oo daacad ah

Masawirkaas ayaan rabnaa in aan iska bixino, waxaana ah mid lagu farxo ah in ay noo arkaan sidaas kuwa na xilsaarta iyo kuwa aan shaqo la wadaagnoba



”waxaan u arkaa DHAWAANSHO sidii miisan ay isku dheellitiran yihiin baahiyaha jirra halkaas oo DHAWAANSHO ay ka taagan tahay bartamaha si ay u soo jiiddo is afgarad iyo is fahan dhexmara dhinaxyaha”

Ingrid Wikström
Oo leh shirkadda
DHAWAANSHO



NÄRA